Somali

Tilmaamid Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee Kireeye-yaasha & Wakiilada

(A guide to Local Housing Allowance for landlords and agents)

Warqaddan daabacani waxay sharxaysaa habka cusub ee loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso. Habka cusub waxa la yidhaa Gunnadda Guriyeynta Maxalliga ah (LHA). Habkani wuxu dhaqan-geli doonaa laga bilaabo 7da Abril, waana isku-mid meel kasta oo aad ku nooshahay. Haddii aanad garanayn Kawnsalka ay hoos timaado xaafadda aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biil-kaaga cashuurta kawnsalka.

Dib u habaysan 6 Apriil 2009

Waa maxay Dheefta Guriyeyntu?

Dheefta Guriyeyntu waxa weeye caawimaadda la siiyo dadka dakhligooda iyo lacagta kaydka ah ee ay haystaan hoosayso si ay ugu bixiyaan kiradooda. Waxay ku salaysan-tahay qiimayn lagu sameeyo dakhli-gaaga, kayd-kaaga dadka guriga kula degan. Xisaabintaasi waxa ku dhex-jira qadarka dheefta ugu saraysa ee ay heli karayaan.

Waa maxay Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi?

Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA) waxa weeye habka cusub ee loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee uu kiraysta-haagu heli karayo. Qofta oo ay saameeyaan qawaaniinta cusub waxa Dheeftooda Guriyeynta loo xisaabin doonaa sidan, halkee uu Sarkaalka Kiradu ka dejin jiray heerka dheefta.

Adeega Kiradu waxay usoo saari doonaan heerar kirada ugu saraysa dhammaan xajam kasta oo ay leeyihiin guryuhu, waxana kuwaasi lagu baahin doonaa weybsayt kasta oo ay kawnsalku leeyihiin. Inkasta oo dheefta kiraysta-haaga la xisaabin doono ayada xisaabta lagu darsanayo dakhli-gooda, lacagta kaydka ah ee ay haystaan iyo dadka guriga kula nool, hadana ka badan mayso qadarka ugu badan ee kirada loo xadiday.

Waxa weliba intaasi dheer, sida ay dhigayaan qawaaniinta (LHA), kiraysta-haaga si toos ah ayaa loo siinayaa Dheeftooda Guriyeynta, duurufoo gaar ah mooyaane. Nala soo xidhiidh wixii macluumaad dheeraad eek u saabsan arintan.

Waa ayo cidda lagu dabaqayo (LHA)?

LHA waxanu ku dabaqani doonaa codsiyada cusub ee aanu ka helno kirayste-yaasha 7da Abril 2008 ama wixii ka dambeeya kuwaas oo hooy ka kiraystay kireeye khaas ah. Waxa kale oo ay samayn ku yeelan doontaa kirayste-yaasha horeba u qaadanayey Dheef Guriyeyn kuwaas oo u guuray hooy ay ka kiraysteen kireeye khaas ah 7da Abril 2008 ama wixii ka dambeeya.

Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi **ma** saamaynaso:

- kirayste-yaasha guri ka kiraystay kireeye-yaasha maamulka maxalliga ah (‘kirayste-yaasha kawnsalka’);
- Kirayste-yaasha ururada bulshada ee diiwaan-gashan;
- guryaha la taakuleeyo qaarkood;
- kiraysiyada bilowday ka hor 15 Janaayo 1989 (2 Janaayo 1989 Scotland);
- kiraysiyada ku noolaansha karafaano, guri-doonyeed ama hostels; ama
- kiraysiyada uu Sarkaalka Kiradu go’aansaday in ay qaybta badan kiradu ay tahay cuntooyinka loo kariyo kirayste-yaasha.

Kooxahan waxa lasii wadayaa in Dheeftooda Guriyeynta loogu xisaabiyo qawaaniinta hadda jirta.

Kiraysta-haygu wuxu horeba u qaadan jiray Dheef Guriyeyn. Miyey isbedeli doontaa?

Maya, isbedeladu waxa saamayn ah kuma yeelan doonaan ayaga. Waxa Dheeftooda Guriyeynta lagu bixin doonaa qawaaniinta hadda jirta, adigana kireeye ahaan lacagtaadu way kuu soconaysaa haddii ay taasi tahay waxa uu kirayste-haagu doortay.

Markaa uu kiraysta-haagu bedelo cinwaanka (xataa haddii ay taasi tahay meel ka duwan oo ah isla dhismaha) ama uu joojiyo codsiga Dheefta Guriyeynta hal toddobaad ama wax ka badan, LHA cusub ayaa lagu dabaqi doonaa.

Sidee ayaa (LHA) loo xisaabin doonaa?

Sakaalka Kirada ayaa inta aan wax kale la samayn dejin doona qadarka Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee uu kiraysta-haagu heli doono. Taasi kuma xidhnaa qadarka kirada aad ku soo

dallacdo. Qadarka ugu sareeya ay heli karayaan wuxu la mid yahay inta ay helayaan cidkasta oo ay isku baaxad yihiin oo kula nool xaafadda, inta ay doonto ha noqoto faraq u dhaxeeya dhab ahaan kirada ay bixiyaan dadka guryaha kale degani.

Meelaha suuqa kirada ballaadhan

Adeega kiradu wuxu wadanka u qaybiyey meelo suuq kiro ballaadhan (BRMAs). Meelahaasi oo ka kooban tiro xaafado ah. Waxa Meel kastaa jiri doonaa guryo nooc kastaba isugu jira oo ballaadhan oo masaafad maquul ah u jira adeeyada kala duwan ee dadweynaha sida caafimaad, wax-barasho, raaxo, adeeg bangi iyo dukaanaysi.

Macluumaadka lasoo ururiyo, kirada meel dhexaadka u ah kirooyinka laga qaado xaafad kasta ayaa noqon doonta raqamka loo isticmaalo sicir goynta Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah. Xaafad kastaa waxay yeelan doontaa siciro kala duwan oo ku salaysan tirada qolalka guri-degane-yaal kastaa u baahan-yihiin.

Adeega Kiradu waxay si joogto ah oo xeel dheer u daba-geli doonaan suuqa kirada maxalliga ah ka dibna waxay bilkasta casriyeyn doonaan raqamada Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee u yaal Suuqa Kirada (BRMA). Waxa laga yaabaa in ay raqamadu kor ama hoos u dhacaan ama ay sidooda iska ahaadaan. Taasi macneheedu mahaa in sicirka LHA ee qof lagu dabaqay uu bilkasta isbedelayo. Sicir ayaa lagu dabaqo doonaa bisha ay codsiga soo gudbiyeen, waxana sannad kasta lagu samayn doonaa dib u hubin. Raqamada waxa lagu dhejin doonaa xafiiska Dheefta Guriyeynta ee kawnsalka deegaanka.

Tirada Qolalka

Waxanu go'aamin doonaa inta qol ee uu kiraystuhu u baahan-yahay, sida ay dhigayaan sharciyada Dheefta Guriyeyntu. Haddii ay ku nool-yihiin hal qol oo ay la wadaagaan qalab dad kale (tusaale ahaan, madbakh ama musqul), waxa jira sicir Gunno Guriyeyn Maxalli ah oo u khaas ah. Waxay weliba doonaan sicirkan haddii ay da'aadu ka yar-tahay 25 oo ay iskood u nool yihiin.

Haddii aanay waxa kor yaal ayaga khusayn, waxanu u xisaabin doonaa tirada qololka sida hoos loogu muujiyey.

Hal qol-hurdo midkasta kuwa soo socda.

- Laba is-qaba
- Qof ay da'diisu tahay 16 jir ama ay ka weyn-tahay
- Laba caruura oo isku jinsi ah ilaa iyo inta noqona-yaan 16 jir
- Laba caruura oo ka yar 10 jir
- Ilmo (qof ka yar 16 jir)

Qofkasta waxa lagu tirinayaa mar keliya, kooxda ugu horaysa ee ay ku dhacaan.

Ma tirino qofkasta oo degan guriga marka aanu xisaabinayno tirada inta qol ee ay u baahan-yihiin. Waxanu tirinaa kiraystaha iyo qofka ay is-qabaan, iyo sidookale wixii caruur ama dad dhallin-yar ee ay ka mas'uul-yihiin. Haddii ay jiraan dad waaweyn oo kale oo aan ahayn qaar kharashka cuntada laga bixiyo ama qof qol guriga kiro ka bixiya, kuwaasna waa tirinaa. Hase-yeeshe, ma tirino caruurta la korsado ama wada-jir u kirayste-yaasha.

Muxuu yahay sicirka laygu dabaqayo kirayste-hayga?

Dheefta Guriyeynta ugu saraysa waxay noqonaysaa sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) ee tirada qolalka kiraysta-haagu uga baahan-yahay suuqa kirada xaafadda ay ku nool-yihiin.

Laga bilaabo 6 Apriil 2009, Housing Benefitka ugu **badan** ee uu kiraystahaaga heli karo waa guri shan-qol hurdo leh ee qiimaha Lacagta Guriga. Haddii aad codsasho arji cusub u samaysatid Housing Benefit ama aad u guurtid guri kiro ah wixii ka dambeeya 6 Apriil 2009, waxaa codsashadaada loo qiimaynayaa sida guri shan-qol hurdo leh ee qiimaha Lacagta Guriga ee meesha aad degan tahay.

Haddii uu kiraystahaaga qaato Housing Benefit ee qiimaha LHA ilaa lix iyo wixii ka badan oo qolal hurdo ah, waxaa kuu soconaya qiimahaa ilaa iyo inta kayskooda dib loo eegi doono. Haddii ay xaalada kiraystaha waxba iska badelin, waxaa dib loo eegi doonaa hal sanno kadib markii ay codsadeen Housing Benefitka ama sannad kadib dib u eegistii ugu dambaysay. Dib u eegista kadib, waxaa laga yaabaa in kiraystahaaga Housing Benefitkiisa u sii socon doono ilaa iyo 26 isbuucood ee kan hadda haysatid qiimaha Lacagta Quriga. Waxaa codsigooda dib loogu eegi doonaa sida shanta–qol hurdo ee qiimaha Lacagta guryaha ee xaafadaada.

Adeega Kirada ayaa baahin doonaa siciro (LHA) cusub bilkasta. Sicirka lagu dabaqayo kiraysta-haagu waxay ku xidhan-tahay taariikhda ay dalbadeen. Taas oo sida caadiga noqon doonta taariikhda aanu helnay foomka codsi ama taariikhda ugu horaysa ee ay codsadeen Dheef Guriyeyn haddii ay ku soo celiyaan foomka codsiga muddo bil gudeheed ah laga bilaabo taariikhdaasi. Waxaba kuma jiraan haddii taariikhda aanu bixinaynaa Dheeftaada Guriyeynta ay tahay bisha ku xigta, waayo dheeftoodu waxay weli ku salaysnaan doontaa sicirka lagu dabaqay markii ay soo codsadeen.

Kirada kiraystuhu waxay ka saraysaa Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah.

Dheefta ugu saraysa ee uu kiraysta-haagu heli doonaa waxa weeye sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA) ay taagan-tahay xaafad-dooda (BRMA) bisha ay soo codsadeen. Haddii ay kiradaadu ka badan-tahay raqamkaasi, ayaga ayaa ka masuul ah in ay buuxiyaan wixii ka dhiman. Haddii ay kula tahay in ay taasi dhibaato ka haysato, waxad u sheegtaa in ay nala soo hadlaan ama ay kala tashadaan xafiiska talo-siinta muwaadinniinta.

Kirada uu bixiyo kiraystuhu waxay ka hoosaysaa Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA).

Haddii ay kirada kiraystuhu ka hoosayso Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA), Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee ay heli karayaan waxa weeye kiradooda, oo lagu daro ilaa iyo £15 toddobaadkii. Taas oo ah qadarka ay Dawladdu go'aansatay in ay ku xaddido (LHA). Ma heli doonaan Dheef Guriyeyn oo ka badan sicirka (LHA). Haddii ay (LHA) ka badan waxa ka badan £15 toddobaadkii kiradooda, waxay heli doonaan oo keliya £15 toddobaadkii taas oo dheer kiradooda. Lacagtaasi dheeraadka maaha in ay adiga ku siiyaan.

Tusaale
Kiro = £90 toddobaadkii
LHA = £120 toddobaadkii
Dheefta Guriyeynta ugu Saraysa = £105 toddobaadkii

Tusaale
Kiro = £90 toddobaadkii
LHA = £100 toddobaadkii
= £100 toddobaadkii

Waxan go'aansady in aan kirada korhdiyo, miyey kordheysaa Dheefta Guriyeynta uu qaato kiraysta-haygu si ay u daboosho taasi?

Maya, waxanu dib u-hubin doonaa sicirta Gunnadaada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) sannad kasta, anaga oo isticmaalayna taariikhda ay dalbadeen. Waxanu markaasi bedeli doonaa sicirka (LHA) si loogu saxo sicirka bishaasi inta ay leeg-yihiin guri wada-gale-yaasho. Waxanu sicirka dib u hubin doonaa oo keliya waqti kasta oo kale haddii isbedel muhiim ahi ku yimi guri wada degane-yaasha (tusaale ahaan, haddii ilmo 16 jir noqdo ama ciddi guriga usoo guurto).

Wuxu kiraysta-haygu dalbaday in codsigiisa taariikh hore dib loogu dhigo. Waa maxay sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee lagu salaynayaa?

Taasi waxay ku xidhan-tahay haddii ay dalbadeen in codsi-gooda dib loogu dhigo taariikh ka horaysa 7da Abril 2008 iyo haddii kale.

Haddii aanu go'aansano in aanu codsi-gooda dib ugu dhigno taariikh ka horaysa 7da Abril 2008, waxanu codsi-gooda ku sifeyn doonaa in taariikhda ay dalbadeen ay ka horaysay fulinta qawaaniinta Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah. Sidaasi darteed, Dheeftooda Guriyeynta ugu saraysaa waxay ku xidhnaan doontaa go'aanka uu gaadho Sarkaalka Kiradu. Waxa la bedelayaa Gunnada Guriyeynta maxalliga ah (LHA) marka ay guuraan ama haddii ay joojiyaan gunnada ay qaataan ka dibna ay markale dib u biloowdaan.

Haddii ay kirayste-yaashaadu dalbadeen codsi-gooda in dib loogu dhigo taariikh ka horaysa 7da Abril 2008 oo aanu taasi kaa ogolaano, sicirka gunnadaada Guriyeynta maxalliga ahi (LHA) wuxu ku salaysnaan doonaa raqamada khuseeya bisha ay codsadeen in dalab-kooda laga bilaabo. Waxa laga yaabaa in ay raqamadaasi ka duwan-yihiin kuwa bishii ay codsi-gooda soo gudbiyeen. Waxanu dib u-hubin doonaa sicirta Gunnadaada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) sannad guurada ka soo wareegta maalinta uu codsigoodu dhab ahaan bilowday.

Waxan had iyo jeer toos lay siiyaa Dheefta Guriyeynta kiraysta-hayga. Taasi miyuu sharciga cusubi wax ka bedelayaa?

Haa. Mid ka mid ah isbedelada sharciga cusub waxa weeye in Dheefta Guriyeynta la siiyo, sida ay tahay inta badan, qofka codsiga soo gudbiyey. Ayaga ayaa ka masu'aal ah in ay hubiyaan in ay ku siiyaan qadarka kirada saxa ah waqtiga ku haboon. Waxanu siin doonaa macmiishayada talo ku saabsan sida loo furto xisaab bangi oo waxanu u diyaarin doonaa faah-faahin ku saabsan xisaabaha la helayo qaarkood. Waxa laga yaabaa in ay meesha ku jirto in aad ka fiirsato sida aad kiradaada si caadiya ugu ursursanayso ee aad ugu bedeli lahayd nooc nidaam otomaatig ah (tusaale ahaan, amaro-siin bangi joogto) haddii aanad taasi horeba u samayn.

Waxa jira waqtiyo aad u yar oo aanu Dheefta Guriyeynta toos kuu siin doono. Waxanu taasi samaynaa oo keliya haddii aanu u malaynayno in ay dhibaato kaa haysato maamulidda kiradooda arimaha lacagtooda, haddii aad u malaynayso in ay xaaladiisu sidaasi tahay mid ka mid ah kirayste-yaashaada, waa in aad nala soo xidhiidho. Waxa laga yaabaa in aanu kaa codsano in aad buuxiso foom. Xaalad kasta goonideeda ayaanu go'aan uga gaadhnaa sida uu dhigayo sharcigu. Waxa laga yaabaa in aanu u baahano caddayn aad ka keento qof ama urur. Waa in aad u sheegto kiraysta-haaga in uu wixii macluumaad dheeraad ah anaga nala soo xidhiidho ama uu la xidhiidho xafiiska talo-siinta muwaadiniinta.

Kirayste-hayga waxan ku leeyahay kiro. Dheeftooda ma waxa weli loo siinayaa toos?

Nala soo hadal haddii uu kirayste-haagu ugu yaraan sideed toddobaad kaala daaheen kiradooda. Haddii ay xaaladu sidan tahay, waxa laga yaabaa in aanu lacagta toos kuu siino.

Sidee ayaan ku ogaan karayaa sicirka kirada gurya-hayga (LHA) ka hor inta aanu kiraysta-haygu dalban Dheef Guriyeyn?

Waxad u baahan-tahay in aad ogaato sicirka (LHA) ay kirada guryuhu ka taagan-tahay meesha ay gurya-haagu ku yaalaan. Waxad macluumaadkaasi ka helaysaa xafiisyadayada iyo websayt-kayaga.

Hase-yeeshe, sicirka dhabta ah ee Dheefta Guriyeynta kiraysta-haaga lagu salaynayaa waxa kale oo ay ku xidhan-tahay tirada dadka guriga la gala. Waxa laga yaabaa in aanay daruuri ahayn in tirada qolalka ay u baahan-yihiin ay la mid noqoto tirada qolalka hurdo ee dhab ahaan gurigu leeyahay.

Ma waxay had iyo jeer Dheefta Guriyeynta kiraysta-haygu ahaan sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) oo buuxda?

Maya, habka aanu u xisaabino Dheefta Guriyeynta anaga oo isticmaalayna dakhliga iyo lacagta kaydka ee uu kiraystahu haysto isma bedelayso. Waxanu ku isticmaalaynaa qawaaniinta (LHA)ga si aanu u xisaabino Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee uu xaqa u leeyahay. Waxa laga yaabaa in ay helaan qayb ahaan keliya qadarkaasi lacagta, hase yeeshe, waxay ku xidhan-tahay heerka dakhli-gooda iyo kaydka ay haystaan. Wixii macluumaad dheeraad ah eek u saabsan sida aanu u xisaabino, waxad ka eegta waraaqa-yar ee daabacan ‘Ka caawinta Hawl-gabe-yaasha Kirada iyo Cashuurta Kawnsalka’ ama ‘Ka caawinta Kirada iy Cashuurta Kawnsalka Dadka D’ada Shaqaynaysa ah’.

Wuxu kiraysta-haygu ii sheegay in ay tirada dadka guriga la galaa isbedeshay. Miyey taasi saamayn ku leedahay sicirka (LHA) ee lagu xisaabinayo dheeftooda?

Haa. Taasi waxa weeye isbedel muhiim ah oo waxanu u xisaabin doonaa Dheftooda Guriyeyn anaga ku isticmaalayna (LHA)ga saxa ah tirada dadka cusub ee guriga la gala

Waxa kale oo aanu bedelnaa marka qof guriga wada-gashaan sannad guurada dhalashadiisu saamayn ku yeelanayso sicirka (LHA) (tusaale ahaan, marka uu ilmuhu gaadho16 jir).

Adiga ama kiraystaha midkiin waa in uu noo soo sheego haddii uu qof ku soo biiro ama uu ka baxo guriga.

Ma ogoli sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee lagu dabaqay guri-gayga. Aniga ama kiraysta-haygu rafcaan ma ka qaadan karaynaa?

Maya, rafcaan lagama qaadan karayo sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA). Sababta oo ah heerka waxa loo dejiyey gebi ahaan sicirka Kirada Suuqa Xaafad-daasi (BRMA) oo wixii isbedel ahi wuxu saamayn ku yeelanayaa dad raalli ka ah sicirka.

Halkee ayaan ka heli kaayaa talo dheeraad ah?

Haddii aad u baahan-tahay cawimaad dheeraad ah ama talo, waxad la xidhiidhaa kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. (waxad ka heli karaysaa magaca kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga xaashadda biilka ee aad ku bixiso cashuurta kawnsalka).

Waxa kale oo aad cawimaad dheeraad ah ka heli karaysaa websaydada soo socda.

www.dwp.gov.uk – Waaxada Shaqada iyo Hawl-gabka

www.therentservice.gov.uk – Adeega Kirada

www.adviceguide.org.uk – Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta

Talo Madax-bannaan

Haddii aad u baahan-tahay talo madax-bannaan, waxad la xidhiidhaa Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta ee ku yaal deegaan-kaaga. Waxad ka heli karaysaa tilifoonadooda (iyo lambarada wakiilada talo-bixinta kale ee deegaanka) Buuga Tilifoonka iyo maktabada deegaanka, ama adiga oo la xidhiidhaya kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajalad la dhegaysto ah iyo luqado kale. Wixii macluumaad dheeraad booqo websayt-kayaga www.benefit-leaflets.org for more information.